



Sharciga Qilaafka Kale iyo Qoyska

Dhammaan Dumarka. Sharciga Hal Qoys.
Ogow Xaquuqdaada.

flew Family Law
Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et
droit de la famille
Le droit de savoir

First edition by:



CCMW

Gollaha Kanadiyeenka ee Dumarka Muslimka (CCMW)
Le conseil canadien des femmes musulmanes



Sharciga Qilaafka Kale iyo Qoyska

Buug-yarahaan waxaa loogu tallogalay inay ku siiso aasaas faham ee arimaha sharciga. Badel uma ahan tallada sharciga shaqsiga iyo caawinta. Haddii aad la macaamileysid arimaha sharciga qoyska, waxaa lagu taliyay inaad heshid tallo sharci sida ugu dhaqsaha badan ee suurtoogalka si loo fahmo dooqyadaada iyo si loo illaaliyo xaquuqdaada. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan sida loo helo oo loo bixiyo qareenka sharciga qoyska, fiiri buug-yaraha FLEW iyo webinaarka ee "Helida Caawinta iyo Dhibaataada Sharciga Qoyska". Waxaa sidoo kale jiro illo kale ee dumarka Muslimiinta ee websaydka FLEW. Buuxi liiska, booqo: <http://www.onefamilylaw.ca/en/muslimwomen/>.

Warbixintaan waxaa lagu diyaariyay wada tashiga dumarka Muslimka oo waxaa loogu tallogalay inay siiso dumarka Muslimiinta ee leh warbixinta aasaaska ee ku saabsan sharciga qoyska ee Ontario sida ay quseyso bulshooyinka Muslimka.

Markii adiga iyo xaaskaaga ama lamaanaha kala go'aan, waa inaad la macaamishaa dhoor arimaha sharciga. Tusaale ahaan, waa inaad go'aansataa wax ku saabsan taageerada dhaqaalaha, sida loo daryeelo carruurtaada iyo sida loo kala gooyo hamiyada qoyska. Waxaad aadi kartaa maxkamada si aad u gaartid go'aamadaan. Waxaad sidoo kale sameyn kartaa diyaarinada aan rasmiga aheyn ama isticmaal **xalka qilaafka kale (ADR)**.

ADR laga yaabo inay san noqon dooq wanaagsan ee xaliya qilaafka qofka rabshad badnaa ama xadgudub badnaa, kaas oo isku dayay inuu kuu xoogsheegto, ama qof leh awood adi kaa badan. Haddii aad xaaladaan ku jirtid, waa muhiim inaad kala hadashid qareen dooqyada sharciga qareenka.

Waa maxay ADR?

Xalka qilaafka kale, ama ADR, waa qaab aan rasmi aheyn ee lagu xaliyo qilaafka, ka baxsan Maxkamada. Dadka way ka xaajoon karaan nafsadooda, ama shaqada dadka kale ee lagu caawinayo gaarista heshiiska xaaskooda hore ama lamaanaha. Waxaa jiro xirfadlayaasha kale ee adiga ku caawin karo, sida qareenka, dhexdhexaadiyaha ama garsooraha. Laguuguma qasbi karo ADR oo dacwada sharciga qoyska. Adiga iyo xaaskaaga ama lamaanaha waa inuu u doortaa si xor ah.

Haddii aad ka fakareysid isticmaalida ADR, waa fikrad wanaagsan in **lala hadlo qareen marka koowaad**, ee hubiyaa inaad garanaysid xaquuqaha aad ku leedahay sida waafaqsan sharciga.

Sidee ayay ADR kuu caawin kartaa?

Labada xaas ee is qabo iyo lamaanayaasha aan la magacaabin way isticmaali karaan ADR. Xaaladaha sharciga qoyska ee qaarkood, ADR way ka wanaagsanaan kartaa Maxkamad aadida sababtoo ah:

- go'aansashada heshiiska xaaskaaga ama lamaanaha wuu dagdagsanaan karaa oo ka sahlanaan karaa Maxkamad aadida;
- waxaad leedahay xakameyn badan oo dhinaca sida loo xaliyo arimaha qoyskaaga;
- adiga iyo xaaskaaga ama lamaanaha wuxuu aad ugu dhawaan karaa inuu raaco heshiiska sababtoo ah waxaad dooratay oo aad ogolaatay waxa ku jiro.

Haddii labadiinaba adiga iyo xaaskaaga ama lamaanaha aad cadaalad ahaan kartaan, furnaan iyo daacad, ADR waxay noqon kartaa qaab wanaagsan ee labadiinaba aad ka shaqeysaan arimaha aad qabtid markii xiriirkaaga dhammaado.

ADR ma ahan marwalba xal u wanaagsan qof walba. Tusaale ahaan, ADR aad ayay ugu adkaan kartaa lamaanayaasha haddii:

- ka wada shaqeyn kartaan si aad u xalisaan dhibaatooyinka;
- aad dareentaa in xaaskaaga/lamaanaha uusan ku dhageysan adiga ama ku ixtiraama;
- xiriirkaaga ahaa mid xadgudub ah ama rabshad;
- xaaskaaga/lamaanaha isku dayay inuu kuu xoogsheegto ama ku cabsi geliyo;
- xaaskaaga/lamaanaha leeyahay awood badan ee laguugu qasbayo inaad ogolaatid ama aad ka faa'ideysatid adiga.

Haddii aad tixgelineysid ADR iyo xirfadlaha, waa fikrad wanaagsan in la weydiiyo haddii ay u tababaranyihiin inay fahmaan xiriirada xadgudubka oo ka hortaga xadgudubka inta lagu jiro nidaamka ADR. Ma ahan in qareen walba, dhaxdhaxaadiye ama garsoore inuu qabo tababarkaan. Waa fikrad wanaagsan in lagala hadlo qareen haddii ADR ay kuu wanaagsantahay.

Waa maxay noocyada qaar ee kala duwan ee ADR?

Noocyada kala duwan ee ADR waxaa loo isticmaali karaa in lagula macaamilo qilaafyada sharciga qoyska, sida: **heshiiska, dhexdhexaadinta, garsoorka, iyo sharciga qoyska iskaashiga.**

1. Wadahadalka

Wadahadalka wuxuu noqon karaa mid aan **rasmi u aheyn**. Adiga iyo xaaskaaga ama lamaanaha ka hadla ama isku daya inaad heshiis gaartaan. Waad isla hadli kartaan, ama waxaad kireysan kartaa qareen kugu caawiyo sharaxaada waxa aad rabtid. Muhiim mahan in la isticmaalo qareenada si lagaagala xaajooda, laakin waa fikrad wanaagsan.

Wada xaajoodka waxay noqon kartaa mid caawin leh xittaa haddii dacwada sharciga qoyskaaga ay Maxkamada u socoto. Waxaad weli isku dayi kartaa inaad la xaajootid heshiiska u dhaxeeyo adiga iyo xaaskaaga/lamaanaha, garsooraha ka hor inta uusan go'aansan dacwadaada.

Markii aad ka xaajooneysid, waxaad gaari kartaa heshiis qoran. Waa muhiim in la hubiyo in heshiiska **hoos ku qorantahay taariiqda**, oo **ay saxiixeen** labadiinaba. Qofkale waa inuu daawadaa labadiina oo saxiixayo, iyo sidoo kale saxiix heshiiska **marqaatiga**. Haddii heshiiska aan qoraal aheyn, aad ayay ugu adkaanaysaa in la cadeeyo waxa lagu heshiiyay iyo si loo fulliyo heshiiska. Waa muhiim in dib loola eego heshiiska qareen intaadan saxiixin ka hor.

Khul ama Khula

Khul ama khula, waa furiinka ay codsadaan xaaska, sida waafaqsan dhaqamada Islaamka. *Khul* caadi ahaan waxaa ku jiro heshiiska xaaska ee dib loo siinayo lacagta ka qeyb aheyd heshiiska guurka. Xaaska iyo ninka way ka xaajoon karaan arimaha kale ee qoyska markii ay isku raacaan *khul*. Waa inaad ogaataa in xittaa haddii aad ogolaatid *khul*, waxaad sidoo kale u baahanaysaa furiin sida waafaqsan sharciga Kanadiyaanka, si loogu tixgeliyo sharci ahaan mid furan oo sharci ahaan u suurtoogaleyso inuu markale ku guursado Kanadiyaanka.

2. Dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadinta waa nidaamka jaheeyo qofka kugu caawinayo adiga iyo xaaskaaga ama lamaanaha inay xaliyaan arimaha qoyskaaga. **Dhexdhexaadiyaha** ayaa ku caawiyo dadka inay isla hadlaan si ay usugu dayaan inay heshiis gaaraan. Dhexdhexaadiyaha qaabka adiga iyo xaaskaaga ama lamaanaha u go'aansaneysaan waxa aad labadiina isku raaci kartaan.

Labada lamaane waa inay dareemaan inay is aamini karaan dhexdhexaadiyaha inuu cadaalad ahaanayo. Dhexdhexaadiyaha caadi ahaan waa xirfdalayaasha, sida shaqaalaha bulshada, cilmi nafsiyaasha ama qareenada. Dhexdhexaadiyaha wuxuu isku dayaa inuu fahmo walaacyada labada jaalal. Dhexdhexaadiyaha ma doorto dhinac ama ma siiyo tallada sharciga hal qof.

Dhexdhexaadiyaha wuxuu soo jeedin karaa qaababka lagu xalinayo qilaafyadaada, laakin dhexdhexaadiyaha makuu sameeyo wax go'aamo ah adiga. Looma baahno inaad raacdid soo jeedinada dhexdhexaadiyaha.

Waa fikrad wanaagsan in lala hadlo qareen ka hor inta aadan ka qeyb qaadan dhexdhexaadinta. Qareenka wuxuu sharaxi karaa xaqiiqahaaga iyo masuuliyadaha laakin caadi ahaan kulama imaado dhexdhexaadinta. Haddii aad gaartid heshiis dhexdhexaadinta ah, waa fikrad wanaagsan in la eego heshiiska qareenka ka hor inta aadan saxiixin.

Haddii aad u qalantid Gargaarka Sharciga Ontario, waxaad heli kartaa tallada sharciga oo bilaash ah ka hor, inta lagu jiro ama kadib dhexdhexaadinta, oo ay ku jiraan tallada ku saabsan heshiiska lagu gaaray dhexdhexaadinta.

Lamaanayaasha Muslimka qaarkood waxay u aadaan Imam-ka caawinta lagu xalinayo arimaha u dhaxeeyo iyaga markii xiriirkooda dumo. Xaaladaan, Imam-ka wuxuu u dhaqmayaa sida dhexdhexaadiyaha. Si ka duwan garsoorada sharciga qoyska (hoos looga hadlay), dhexdhexaadinta sharciga qoyska looma baahno inay raacaan nidaamka qeyb walba ama sharciyada. Tani waxay la micna tahay in dhexdhexaadiyaha uu tixgelin karo mabaadi'da diinta ee xaalada isku dayga laguugu caawinayo adiga iyo xaaskaaga gaartaan heshiis.

Dhexdhexaadinta waa wax labada xisbiba doortaan. Dhexdhexaadinta, xittaa Imam-kaaga ee u matalayo

sida dhexdhexaadiyaha, maku qasbi karo inaad ogolaatid heshiiska. Midkood lamaanaha waxay joojin karaan dhexdhexaadinta xili walba. Haddii aadan heshiis gaari karin lamaanahaaga, dhexdhexaadinta way dhammaataa. Meeshaan, waa inaad isku daydaa nooc ka duwan ee ADR, ama aad Maxkamada.

Halkee ayaan ka heli karaa dhexdhexaadiye?

Haddii ugu yaraan mid ka mid ah xaasaska/lamaanayaasha ay u qalmaan inay helaan Gargaarka Sharciga, kadib Gargaarka Dhaqaalaha Ontario wuxuu siin karaa qaar ka mid ah adeegyada dhexdhexaadinta qoyska oo bilaash ah ee lamaanaha.

Waxaa sidoo kale jiro dhexdhexaadiyaha ee Maxkamadaha Qoyska ee gobolka oo dhan ah. Haddii aad isticmaashid adeegyada dhexdhexaadinta ee guriga maxkamada, waa bilaash. Haddii aad kula kulantid meel kale oo dhexdhexaadinta, waxaa lagaa rabaa inaad bixisid qidmada ku saleysan waxa aad awoodid inaad bixisid. Waxaad sidoo kale kireysan kartaa dhexdhexaadiye gaar ah, haddii aad awoodi kartid inaad bixisid qidmadda.

3. Garsoorka

Garsoorka waa nidaamka halka adiga iyo xaaskaaga/lamaanaha kireysto qof go'aan gaaro si loo sameeyo go'aan lagu xalinayo arimaha qoyskaaga. Qofkaan waxaa loo yaqaan **garsoorka**. Garsooraha kuma siin karo furiin laakin wuu go'aansan karaa haynta canuga iyo helitaanka, lacag bixinada taageerada, iyo sida loo kala gooyo hantida qoyska. Waxaa kaliya oo ay go'aansanayaan arimaha aad weydiisay inay xaliyaan.

Garsoorka waa sida dacwada Maxkamada, laakin si yar ayay rasmi u tahay. Caadi ahaan xaas walba ama lamaanaha waxay leeyihiin qareenkooda gaarka ah. Dhageysiga garsoorka, labadiinaba adiga iyo xaaskaaga/lamaanaha wuxuu siin karaa

warbixin oo dhahaa waxa aad u maleyso inay cadaalad tahay. Kadib markii mid walboo idinka ah hadlo, dhexdhexaadiyaha wuxuu gaarayaa go'aan. Go aankaas waxaa loo yaqaan **dhexdhaxaadinta abaalmarinta dhexdhaxaadinta.**

Waxaa jiro sharciiyo Ontario ee ku saabsan inuu ku dhaqmi karo sida garsooraha sharciga qoyska iyo sida garoosarida sharciga waa in la sameeyaa:

- dhexdhexaadiyayaasha sharciga qoyska oo aan aheyn qareeno waa inay lahaadaan tababarka qaar ee sharciga qoyska;
- dhammaan dhexdhexaadiyayaasha la ansixiyay waa inay lahaadaan tababarka ee sida loo xasuusto aastaamaha rabshada qoyska;
- labadaba lamaane waa inay ka helaan tallada sharciga qareenkooda gaarka ah wax ku saabsan waxa ka dhici karo dhexdhaxaadinta, **ka hor inta aysan bilaaban;**
- dhammaan abaalmarinada dhexdhaxaadinta waa inay qoraal ahaataa.

Gudaha Ontario, dhammaan dhexdhexaadiyayaasha sharciga qoyska waa in uu sameeyaa dhexdhexaadiyaha sharciga qoyska oo waa inay raacaan sharciyada Kanada ama go'aanka sharci ma noqonayo. Tusaale ahaan, dhexdhexaadiyaha ma gaari karo go'aan ku saabsan haynta canuga ama sida loo kala gooyo hantida qoyskaaga ee aan raacin sharciyada sharciga Ontario iyo Kanada.

Waxaad kaliya oo aad go'aansan kartaa inaad isticmaashid dhexdhaxaadinta waqtiga xiriirkaaga dumo. Qawaaniin walba ee heshiiska guurka ama heshiiska inta lagu jiro xiriirkaaga dhahayo inaad balanqaaday inaad isticmaashid dhexdhaxaadinta haddii xiriirkaaga dhammaaday aan la fullin karin. Ma balan qaadi kartid *nikahnameh* ama aqd ee inaad isticmaaleysid dhexdhaxaadinta lagu xalinayo arimaha sharciga qoyskaaga.

Mararka qaar dumarka waxaa lagu cadaadiyaa weydiinta qof ay ixtiraamaan, sida dhaqtarka ama hogaan diimeed, si loo gaaro go'aanka ku saabsan qilaafka sharciga qoyska.

Haddii qofka uusan aheyn dhexdhexaadiye la ansixiyay, go'aankooda si sharci ahaan ah kuma xirno oo lama qasbi karo.

Haddii aad ka walaacsantahay in qofka gaarayo go'aamada ku saabsan dacwadaada aheyn dhexdhexaadiyaha sharciga qoyska la ansixiyay, weydii si aad u aragtid cadeynta ah inay u qalmaan inay sameeyaan shaqadaan.

Mabaadi'da Muslimka ee dhexdhexaadinta qoyska

Mararka qaar Imam- ama qareen Muslim ah ayaa ku siinayo inaad sameysid dhexdhexaadinta iyada oo la isticmaalayo mabaadi'da Muslimka ee lagu xalinayo arimaha qoyska.

Haddii qofka aad dooratay uu u qalmay dhexdhexaadiyaha Ontario, iyo go'aanka xiggo sharciyada Kanada, kadib abaalmarinta dhexdhexaadinta ayaa lagu fullin karaa maxkamadaha.

Haddii qofka aad dooratay uusan raacin sharciyadaan, waxaad weli go'aansan kartaa inaad ogolaatid go'aankooda ee arimaha qoyskaaga, laakin Maxkamada kuma qasbi karto adiga ama xaaskaaga hore ama lamaanaha si loo raaco go'aanka.

Haddii aad ogolaatid dhexdhexaadinta ku saleysan mabaadi'da Muslimka, waa muhiim in lagala hadlo qareenka wax ku saabsan waxa xaquuqahaaga quseyso sharciga Kanada, marka waad fahamsantahay xaquuqahaaga iyo dooqyada.

Sidee ayaa abaalmarinada dhexdhexaadinta lagu fulliyaa?

Dhexdhexaadinta kadib, haddii xaaskaaga hore ama lamaanaha aysan raacin abaalmarinta, waxaad la imaan kartaa codsiga Maxkamada Qoyska si loo fulliyo abaalmarinta. Markii codsiga la xareeyo, Maxkamada waxay fullin kartaa abaalmarinta dhexdhexaadinta saxda ah sida amarka Maxkamada.

Haddii aadan ku faraxsaneyn abaalmarintaada dhexdhexaadinta, waxaa kuu suurtoogleyso inaad weydiisid Maxkamada **si looga racfaan qaato** iyada, tusaale ahaan, haddii abaalmarinta keydiso waqti yar ee aadan weydiisan dhexdhexaadiyaha inuu go'aansado. Waxaa jiri karo sharciyo kaloo sharci ah in abaalmarinta aysan raacin. Waxaad u baahaneysaa inaad lahadashid qareen lagu ogaado haddii aad ka racfaan qaadan kartid abaalmarinta dhexdhexaadinta.

Ogow xaquuqahaaga sida waafaqsan sharciga qoyska
Haddii aadan garaneyn xaquuqahaaga sida waafaqsan sharciyada Kanada, waa muhiim in lala hadlo qareen ka hor inta aadan ogolaan wax dhexdhexaadin ah. Sida waafaqsan sharciyada Ontario, haddii aad ogolaatid dhexdhexaadinta qoyska waxaad sidoo kale ogolaaneysaa INAADAN u aadin maxkamada arimaha isku midka ah. Markii dhexdhexaadinta bilaabato, ma **go aansan kartid inaad ka tagtid**. Waa inaad raacdaa go'aanka dhexdhexaadiyaha xittaa haddii aadan ku raacin. Haddii go'aanka abaalmarinta dhexdhexaadinta xigto sharciga Kanada, sharci ahaan ayay ugu xirantahay.

Dhexdhexaadinta waxay noqon kartaa mid qaali ah sababtoo ah waa inaad caadi ahaan bixisaa dhexdhexaadiyaha, iyo waa inaad lahaataa qareen. Xittaa haddii aadan ku laheyn qareen dhageysiga, waa inaad heshaa tallo sharci ka hor inta aadan ogolaan dhexdhexaadinta. Gargaarka Sharciga Ontario ma bixinayaan dhexdhexaainta sharciga qoyska.

Waa muhiim in la xasuusto sida **dhexdhexaadinta ay uga duwantahay dhaxgalka**. Haddii aad ku jirtid dhaxgalka, waxaad leedahay dooqyo. Waad soo afjari kartaa hadalada xili walbo ama waad go'aansan kartaa inaad ogolaan waxa xaaskaaga ama lamaanaha uu bixinayo ama waxa dhexdhexaadiyaha soo jeediyo. Dhexdhexaadinta, ma lihid dooq. Markii aad ogolaatid dhexdhexaadinta, waa inaad ogolaataa go'aanka dhexdhexaadiyaha, haddiiba uu raaco sharciga.

4. Sharciga Qoyska Iskaashiga

Qaabka **sharciga qoyska dhexdhexaadiyaha** waa koox adiga kuu dhow, xaaskaaga/lamaanaha, qareenka mid walboo idinka mid ah, iyo sida suurtoogalka ah xirfadlayaasha kale. Qaabkaan ma isticmaalo dhexdhexaadiye sadexaad, qof madax banaan ama dhexdhexaadinta.

Sharciga qoyska iskaashiga, qareenadaada way wada shaqeeyaan. Tani way ka duwantahay nidaamka Maxkamada, halka qareenada ay tahay inay diirada saaraan kaliya xiisaha macmiilkooda. Haddii qareenka adiga kugu matalo nidaamka qoyska iskaashiga, waxay balan qaadaan inuusan ku matalin haddii dacwadaada ay u dhammaado Maxkamada.

Sharciga qoyska iskaashiga aad ayuu uga baxsanyahay Maxkamada, laakin laga yaabo inaysan noqon afkaar u wanaagsan lamaane walba, sababtoo ah adiga iyo xaaskaaga/lamaanaha waa inay is ixtiraamaan oo wada shaqeeyaan si loo xaliyo dhibaatooyinkaaga. Qaali ayay noqon kartaa, haddii aad bixisid qareenkaaga, ama bixi shaqaalaha bulshada xirfadlaha, cilmi nafsiga ama la taliyaha dhaqaalaha ee agu caawinayo heshiiskaaga ku saabsan arimaha gaarka ah, sida haynta canuga ama lacagta.

Haddii midkood adiga ama xaaskaaga/lamaanaha u qalmo Gargaarka Sharciga Ontario, waxaa kuu suurtoogali karto inaad heshid illaa 10 saacadood oo tallada sharciga oo bilaash ah, si ay kaaga caawiso gaarista heshiiska lagu xalinayo arimaha qoyskaaaga ee xaaskaaga/lamaanahaaga hore.

Xaaladaha Dacwada:

Tusaalaha 1:

Nadia iyo Ameen waxay u aadeen Imam-kooda tallada ee sida loola macaamilo arimaha sharciga qoyskooda markii guurkooda dumo. Imam-kooda wuxuu bixiyaa tallada ku saleysan Sharciga

Islaamka. Nadia iyo Ameen waxay isku dareen tallada Imam-ka ee heshiiska ay saxiixeen. Miyuu heshiiska abaalmarinta dhexdhexaadinta? Miyaa la fullin karaa?

Jawaabta:

Heshiiska ma ahan abaalmarinta dhexdhexaadinta. Inkastoo Imam-ka bixiyay tallo, muusan sameyn go'aanka. U aadista talo qof kale la mid ma ahan sida dhexdhexaadinta ama abaalmarinta dhexdhexaadinta la fullin karo.

Nadia iyo Ameen waxay raaci karaan tallada Imam-ka oo waxay sameyn karaan heshiis qoran. Waxay noqon kartaa heshiis la fullin karo haddii labadaba Nadia iyo Ameen ku saxiixaan marqaatiyada hortooda kaas oo sidoo kale saxiixo. Sharciga xittaa wuxuu u ogolaadaa dadka inay ka niyad jabaan xaquuqaha qaarkood ee heshiiskooda qoran, haddii dadka saxiixo fahamsanyihiin oo si xor u ogolaadaan heshiiska.

Haddii Nadia iyo Ameen ay rabaan in Imam-ka u gaaro go'aanka ku saabsan xaquuqahooda qoyska iyo masuuliyadaha markii ay kala go'een, waxay xaq u leeyihiin inay weydiiyaan midaas oo doortaan inay raacaan go'aankaas. Haddii ay rabaan go'aanka Imam-ka in ay fulliyaan Maxkamada, Imam-ka waa in laga ansixiyaa dhexdhexaadiyaha sharciga qoyska ee Ontario iyo go'aanka waa inuu raaca sharciyada Kanada.

Tusaalaha 2:

Alma iyo Besim waxay ku ogolaadeen qoraal ahaan si loo gudbiyo arimaha sharciga qoyskooda ee Imam-kooda ee xalinta. Wuxuu leeyahay tababarka sida dhexdhexaadiyaha ee kulliyada bulshada Ontario. Ma weydiiyo Alma iyo Besim inay la hadlaan tallada sharciga madax banaan. Imam-ka ayaa go'aansado dhammaan arimaha taageerada, qeybta hantida iyo ku haynta carruurta Alma iyo Besim, sida waafaqsan mabaadi'da Sharciga Islaamka. Tani ma abaalmarinta dhexdhexaadinta? Miyaa la fullin karaa?

Jawaabta:

Waxay u muuqataa in Imam-ka uu yahay dhexdhexaadiyaha lagu ansixiyay Ontario, laakin abaalmarintaan lama fullin karin. Xittaa haddii Imam-ka leeyahay tababar ku haboon, go'aankiisa lama fullin karo sababtoo ah Alma iyo Besim maysan helin tallada sharciga madaxa banaan. Imam-ka wuxuu ku tiirsami karaa mabaadi'da Sharciga Islaamka haddii go'aanka sidoo kale raaco sharciyada Kanada. Haddii kale, go'aanka laguma fullin karo Maxkamada.

Waxaa jiro illo kale oo dumarka Muslimiinta ee websaydka FLEW. Wixii liis dhameystiran, booqo:

<http://www.onefamilylaw.ca/en/muslimwomen/>.

Waxaa jiro halis weyn ee rabshada markii xiriirka ku dhow xiriirka dhammaanayo. Haddii aad ku jirto halis dhow, soo wac 911. Haddii adiga ama qof aad taqaanid halis ku jiraa, booqo websayd FLEW wixii warbixin dheeraad ah ee taageero helida.

Haddii aad tahay naag faransiis ku hadasho oo ku nool Ontario, waxaad xaq u leedahay inaad heshid adeegyada luuqada Faransiiska ee dacwadaha maxkamada sharciga qoyska. Wixii warbixin dheeraad ah ee la xirriiro xaquuqahaaga, la xiriir qareen, xarunta sharciga bulshada, ama qadka taageerada Femaide ee-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Waxaad ka heli kartaa warbixin badan oo sida loo galo adeegyada ee Faransiiska websaydkeena www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Aragtiyada lagu muujiyay qoraaladaan waa aragtiyada Gollaha Dumarka Muslimiinta Kanadiyaanka (CCMW) FLEW iyo si muhiim ah ha u muujin kuwaas ee Gobolka.

Iyada oo dhaqaala ahaan ay taageereen Aasaaska Sharciga ee Ontario, tasmada daabacadaan si muhiim ah uma muujiso aragtiyada Aasaaska.

Mowduucyada Sharciga Qoyska ee lagu heli karo Ingiriiska*

1. Xalinta Qilaafka Kale iyo Sharciga Qoyska (SOM 001)
2. Illaalada Carruurta iyo Sharciga Qoyska (SOM 002)
3. Taageerada Carruurta (SOM 003)
4. Sharviga Dambiilaha iyo Sharciga Qoyska (SOM 004)
5. Haynta Canuga iyo Helitaanka (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Dhexdhexaadinta Sharciga Qoyska (SOM 007)
8. Arimaha Sharciga Qoyska oo Muhaajirada, Qaxootiyada iyo Dumarka aan Sharciga laheyn (SOM 008)
9. La helida caawinta ee Dhibaataada Sharciga Qoyskaaga (SOM 009)
10. Sida hantida loogj Qeybiyo Sharciga Qoyska (SOM 010)
11. Guurka iyo Furiinka (SOM 011)
12. Taageerada Xaaska (SOM 012)

* *Buuggaagta waxaa lagu heli karaa qaabab kala duwan iyo luuqad. Fadlan ka fiiri www.onefamilylaw.ca wixii warbixin dheeraad ah. Waxaad sidoo kale heli kartaa qoraalo dheeraad ah ee websaydka si laguugu caawiyo fahamka xaquuqaha sharciga qoyskaaga.*

Gollaha Kanadiyaanka ee Dumarka Muslimka
www.ccmw.com

ADR/ENG 001

flew Family Law
Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et
droit de la famille
Le droit de savoir

 **The Law
Foundation
of Ontario**

Funded by: /Financé par:

 **Ontario**

The views expressed in these materials are the views of the Canadian Council of Muslim Women (CCMW) and FLEW and do not necessarily reflect those of the Province.



CCMW

Gollaha Kanadiyaanka ee Dumarka Muslimka (CCMW)
Le conseil canadien des femmes musulmanes